

NABAD MASUULIYIINTA ARDEYDA ISKUULKA IMANEYSA!

Dhammaan ardeyda iskuuladda aasaasiga ah ee luqadaha qariibka ah waxbarashadoodu waxay ka bilaabanaysaa fasalada koobaad.

Magaca luqaddu waa A1- luqadda. La soo barbaro ilmahaaga doorashooyinka luqadaha marka ugu horeysaba.

Turku dhammaan iskuuladda waxbarashooyinka aasaasiga ah waxaad ka baran kartaa A1- luqada ingiriisiga.

Haddii ardeygu uu baranayo A1- luqadda ingiriisiga, wuxuu ka dooran karaa fasalka afraad sidoo kale A2- luqadda ah. Iskuuladu waa A2- luqadaha. Waxbarashada Iwidhishku waxay koleyba bilaabanaysaa ugu dambeyn fasalka lixaad.

Iskuulka Hannuniitu waxaa lagu baran karaa A1- luqadda ingiriisiga ama isbaanishka.

Kooxda isbanishku waxay bilaabanaysaa, haddii ardeydu ay ku filan yihiin. Haddii ardeygu uu baranayo A1- luqadda isbannishka, wuxuu bilaabayaa barashada ingiriisiga fasalka afraad. Intaa waxaa dheer fasalka lixaad oo uu ku bilaabayo iswidhishka.

La soo xidhiidh iskuulka Hnnunniitu maamulhiisa Timo Lehtinen, haddii ilmuhu uu doonayo inuu barto A1- isbannishka.

Iskuulka Hannuniitu waxaa lagu baran karaa A1- luqadda ingiriisiga ama iswidhishka.

Kooxda iswidhiishku waxay bilaabanaysaa, haddii ardeydu ay ku filan yihiin. Haddii ardeygu uu baranayo A1- luqadda iswidhishka, wuxuu bilaabayaa barashada ingiriisiga fasalka afraad.

La soo xidhiidh iskuulka Luostarivuori caawiyaha maamulaha Juha Mäenpää, haddii ilmuhu uu doonayo inuu barto A1- iswidhishka.

Luqadda waa in la doorto, markaad soo diiwaangelineysid ilmaha iskuulka.

Warbixinta dheeraadka ah waxaa bixinaya:

Marjo Haastola, waxbarashada aasaasiga ah ee Turku barashada luqadaha macallinka kobcinaya (dugsiga hoose), t. 040 482 7927 marja.haastola@edu.turku.fi (barashada luqadda ama marinka luqadaha la xidhiidha ogeysiintooda)

Maamulaha Timo Lehtinen, Iskuulka Hannunniitu, t. 0400 944 245 timo.lehtinen@edu.turku.fi (Hannunniitun A1- isbannishka ogeysiimaha la xidhiidha)

Caawiyaha maamulaha Juha Mäenpää, iskuulka Luostarivuori, Martin iyo Kerttulin waaxahooda t. 044 907 4631 juha.maenpaa@edu.turku.fi (Luostarivuori A1- iswidhishka ogeysiimaha la xidhiidha)

Turku waxaa suurtoagal ah inuu ku barto luqaddo kala duduwan sidoo kale fasalka luqadaha

Waxbarashada labada luqadooda ee fasalada luqadaha

Ingiriisi, faransiis iyo jarmal fasalada luqadaha iyo sidoo kale finnishka- ruushka fasaladooda, marka uu isku soo diiwaangelinayo fasalka koobaad. Codsadayaasha waxaa loogu baaqayaa tijaabooyinka fasalka luqadaha.

Labada luqadood waxbarashadoodu uma baahna inuu sii yaqaano luqad ajnabi ah. Meelaha 25% barashada *xiisadaha dulucdoodu waa luqadda lala beegsanayo mudadda waxbarashada aasaasiga ah*. Intaa waxaa dheer ardeyga A1- luqaddu waxay la mid tahay luqadda lala beegsanayo. Ardeygu wuxuu koleyba baranayaa akhriska iyo qoraalka 1, -2. fasalka luqadda finnishka. Waxaad akhrisan kartaa oo intaa dheer waxqabadyada fasalada luqadaha ku wajahan www.kieliluokat.fi iyo www.turku.fi/kieliluokat.

Qulqulka luqadda iswidhishka

Sida qaalibka ah ardeydu waxay dalbanayaan fasalada qulqulka luqadda iswidhishka ka dib , laakiin fasalka waxaad ka baran kartaa sidoo kale markaas, marka iskuulku bilaabmo. Fasalka waxaad ka dalban kartaa, marka aad soo wargelisid fasalka ugu horeeya. Codsadayaasha waxaa loogu baaqayaa tijaabooyinka fasalka luqadaha.

Xilligga barnaamijka ardeygu wuxuu heleyaa ugu yaraan 50 % waxbarashada iswidhishka. Korriinka curdinka ah iyo waxbarashada luqadaha qulqulka ah luqadahoodu waa ku dhawaad 100 %, fasalada sanadka 1-2 meelaha 90 %, fasalada sanadka 5-9 oo dhexdhexaadkii ah 50 %. Ardeyga A1- luqaddu waa iswidhish. Ardeygu wuxuu baranayaa akhriska iyo qoraalka 1, -2. fasalka luqadaha qulqulka ah. waxaad ka akhrisan kartaa oo intaa dheer cinwaanka www.turku.fi/ruotsinkielilyluokat

Warbixinada dheeraad ah

Sirkku Alin, waxabarashada aasaasiga ah ee Turku labada luqadood waxabarashadooda macallinka kobcinaya, t. 040 358 0328, sirkku.alin@edu.turku.fi

Fasalada luqadaha fiidadkooda warbixinaha (fiiri. sidoo kale iskuuladda bogogooda internetka)

talaada 9.1.2024 saacada 18.30 Turku International School <https://sites.utu.fi/tis/>

talaada 9.1.2024 saacadda 18.00 iskuulka Puolala, Kauppiaskatu 14 (ingiriisi, jarmal iyo finnishka-

ruushka) <https://blog.edu.turku.fi/puolala/>

arbaca 10.1.2024 saacadda 18.00 iskuulka Vähä-Heikkilä (faransiiska)

<https://blog.edu.turku.fi/vahaheikkila/>

khamiis 11.1.2024 saacadda 18.30 iskuulka Luostarivuori Martin yksikkö (qulqulka luqada iswidhishka) <https://blog.edu.turku.fi/martti/>

khamiis 11.1.2024 saacadda 18.30 Iskuulka Normaalikoulu Turku (ingiriisi) <https://sites.utu.fi/tnk/>

Ardeygu wuxuu bilaabayaa ingiriisiga A2- luqada 4. fasalka, haddii ardeygu uu doorto A1- luqadda marka ugu horeysa fasalka luqad kale oo aan ahayn tan ingiriisiga.

Masuulka ayaa diyaarinaya gaadiidka u qaadaya iskuulka, haddii ardeygu uu dalbanayo luqada sida ku saleysan meel aan ahayn iskuulka u dhow.

Barashada luqaddaada afka hooyo (MAI)

Ardeygu wuxuu dalban karaa luqadiisa hooyo barashadeeda oo ah MAI- barashadeeda, haddii ardeyga luqadiisa hooyo aynan ahayn finnish ama iswidhish. MAI- waxbarashada ah waxaad dalban karaa sidoo kale ardeyga, kan ku bartey luqadda tusaale ahaan dalka dibadiisa. Turku waxaad wakhtigan xaadirka ah ku baran kartaa luqadda hooyo ahaan 28 luqadood oo kala duduwan. Ardeygu wuxuu ku buuxinayaa waxbarashada aasaasiga ah, iyo taas oo ah laba saacadood todobaadkii. MAI- waxarashada ah waxaa la iska diiwaangeliyaa dhinaca Wilmada barta codsiyada iyo go'aamada (MAI- hakemud).

Intaa waxaa dheer oo aad ka akhrisan kartaa cinwaanka: www.turku.fi/monikulttuurinenopetus